

RAACITAANKA BASKA

Waxaad hubisaa inaad xiran tahay maaskarada adiga oo daboolaya sankaaga iyo afka

Ugu yaraan 1 mitir waa inaad u jirsataa ardayda kale marka aad bannaanka joogto iyo markaa baska la socoto.

Wadaha baska ayaa kuu sheegi doona kursiga aad fadhiisaneyso. Arday kasta waxa la siin doono kursi ku yaala daaqaada.

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN



WELCOME

IMAANSHAHA

ISKUULKA

ELBOWS
ARE THE NEW
HANDS



Waxaad hubisaa marka aad imaneyso iskuulka inaad xiran tahay maaskarada adiga oo daboolaya sankaga iyo afka

Waxaad hubisaa ugu yaraan 2 mitir inay idiin dhaxayso ardayda kale marka aad joogto gudaha iyo dibada iskuulka.

Waxaad hubisaa inay wax calaamado ah ama ay dhulka wax ku qoran yihiin kuu tilmaamaya meesha aad ku soconeyso

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

SIDA AYUU EKAAN DOONAA FASALKAAGU

Miisasku waxa ay isku jirayaan 6 fiit(qiyaas ahaan 2 mitir)

Dhammaan fasalada waxaa yaala hawo nadiifiyaal!

Daaqadaha/maraxawaduhu waxay ku wareejin doonaan fasalada hawo

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

MARKA HOOLASHA ISKUULADA LA SOCDO

Waxaad hubisaa ugu yaraan inaad 2 mitir adiga iyo ardayda kale isku jirsataan marka aad socotaan hoolasha iskuulkaaga

Waxaad hubisaa inay wax calaamado ah ama ay dhulka ku qoran yihiin calaamado kuu tilmaamaya meesha aad ku soconeyso

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

SIDA LOO XIRTO MAASKARADA MARKA ISKUULKA LA JOOGO

Waa inaad maaskarada xirnaataa mar kasta, ilaa uu macallinkaagu kuu sheegayo inay CAADI tahay inaad iska furto maaskarada.

Maaskaradaadu waa inay qarisaa sankaa iyo afkaaga labadaba.

Hala wadaagi maaskaradaada saaxibadaa


Haddii maaskaradu ay dhib kugu hayso, waa inaad u sheegto macallinkaaga, waalidkaa ama daryaal bixiyahaaga.

Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN



GACMO DHAQISTA

Waxaad hubisaa inaad si joogto ah u dhaqdo gacmahaaga, laakiin gaar ahaan ka hor iyo ka dib marka aad isticmaasho musqusha iyo markaa aad cuneeyso quraacda ama qadadda.

Saabuun ku dhaq gacmahaaga adiga oo si wada jir iskugu xoqoya- nadiifi xagga dambe ee gacmahaaga, faraha dhexdooda, iyo cidiyaha hoostooda.

Gacmahaaga isku xoq ugu yaraan 20 ilbidhiqsi

Si fiican biyaha u raaci gacmahaaga adiga oo nadiifiyana

Qalaji gacmahaaga adiga oo isticmaalaya xaashiyaha lagu qalajiyo ama hawada lagu qalajiyo

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

SIDEE IYO GOORTA AAN HELAYAA QURAAAC IYO QADDO

(ARDAYDA K-5 EE KA
QEYBQAADANEYSA
WAXBARASHADA
ISKUDHAFAN)?

Cunto
ayaa diyaar
kuu ah oo aad soo
qaadaneysa marka
maalintii iskuulku
dhammaado.

**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

XANUUN BAAN DAREEMAYAA. MAXAAN SAMEEYAA?

Haddii aad ku sugan tahay guriga: U sheeg waalidkaaga/ daryeel-bixiyaha. Guriga joog. Adiga oo raacaya tallooyinka ay ku siiyaan takharkaagu. Waalidkaagu waa inay soo wargaliyaan iskuulka xanuunkaaga.

Haddii aad ku sugan tahay iskuulka: Si degdeg ah ugu sheeg macallinkaaga. Macallimiintu waxa ay ardayda xanuunka dareemeya u diri doonaa inay la kulmaan kaalkiyaha caafimadka iskuulka iyaga ku arki doona goob loo asteeyey.



**Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista
Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.**



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

MARKA ISKUULKA LAGA TEGAYO



PLEASE WEAR A FACE MASK BEFORE ENTERING



THANK YOU

DO NOT ENTER IF YOU HAVE A COUGH OR FEVER



PLEASE KEEP 6 FEET DISTANCE



ATTENTION
DO NOT ENTER IF YOU HAVE A COUGH OR FEVER

ATENCIÓN
NO ENTRAR SI TIENE TOS O FIEBRE

CHÚ Ý
ĐỪNG VÀO NẾU BỊ HO HOẶC SẼ SỐNG SỐNG

FEELIGNOW
HAS YOU CALM HANDS AND TEMPERATURE TAKEN DAILY

BIHIMANISE
KAYO PAK KASIGAN NG TINDERATYVA, HE BILIGANTE

PLEASE KEEP 6 FEET DISTANCE

FOR FAVOR
MANTENER 6 PIES DE DISTANCIA

XIN VUI LÒNG
CÁCH XA 6 FEET

FADLAN
WAKAAD ISKA JIRLANTAAN TALLAABO

請
保
持
距
離

Hubi inaad wixii alaab ah ee aad leedahay aad guriga u sii qaadato

Hubi inaad xirnaanto maaskaradaada adiga oo daboolaya sankaga iyo afkaba

Waa inaad isku jirsataan adiga iyo ardayda kale 6 fiit(qiyaas ah 2 mitir) marka aad iskuulka ka tegeyso

Ku-noqoshada Iskuulka: Dib-u-Furista Macluumaadka Ardayda Waxbarashada Iskudhafan.



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

HUBIYAHA ISKA BAARIDDA XANUUNKA EE MAALINLAHA AH

Shaqaalaha iyo waalidiinta/mas'uuliyiinta ardayda waxaa looga baahan doonaa inay iska baaraan maalin kasta astaamaha cudurka ka hor intaysan galin dhismaha degmada ama aysan isticmaalin gaadiidka degmada. Hubiyaha Is-baarista waa in loo adeegsadaa in lagu go'aamiyo haddii ay jirto halista jirro ama u-baylahsanaanta COVID-19. **Haddii shaqaalaha ama ardaygu leeyahay mid ka mid ah astaamahan soo socda ama uu u baylahay COVID-19 14-kii maalmood ee la soo dhaafay, waa inuu guriga joogaa oo u soo sheegaa maqnaanshahiisa iyo astaamahiisa dugsiga ama kormeeraha ku habboon, lana xiriiraa bixiyahooda daryeelka caafimaad haddii loo baahdo.**

Ka helidda/Ka ag dhawaansho/U baylahsanaanta suuragalka ah ee COVID-19 (14 maalmood ee la soo dhaafay)

- Shaqaale, arday, ama qof ka tirsan qoyskooda oo laga helay COVID-19
- Shaqaale ama arday ayaa ka ag dhawaaday (6 fuudh gudahood) qof qaba COVID-19 ugu yaraan muddo isugeyn 15 daqiiqo ah maaintii.
- Shaqaale ama arday ayaa uu ka codsaday inuu is gooniyeeyo ama isku karantiilo guriga xirfadle caafimaad ama waaxda caafimaadka bulshada ee deegaanka
- Shaqaale ama arday leh xubin reerka kamid ah oo ka ag dhawaaday (u jirsaday 6 fuudh qof cudurka qaba ugu yaraan muddo 15 daqiiqo ah) qof laga helay COVID-19, haatana uu xubinta reerku leeyahay astaamo jirro.

Astaamaha Aasaasiga ah ee COVID-19

- Qandho (heerkulka 100.4°F ah ama ka sareeya) ama qarqaryo
- Qufac cusub oo aanuu baarin ama uusan ansixin bixiyaha daryeelka caafimaadku
- Neef yari ama neefsashada oo adkaata oo aan la garanayn sababteeda
- Dhadhan ama ur lumin cusub

Astaamaha Dheeraadka ah ee Ka Reebida Jirrada

- Matag
- Shuban
- Firiiric ama nabaro aan la aqoon



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN